Somalisk

WARBIXIN KU SOCOTA MAGANGELYO-DOONAYAASHA NORWAY

NOAS

Qoraalkan waxa diyaariyey Ururka norwejiga ee magangelyo doonka NOAS. NOAS waa urur ka madaxbannaan dowladda oo u dooda xuquuqda bini'aadanka, waxana uu siiyaa warbixin iyo caawimo dhinaca sharciga ah dadka magangelyo doonka ah. Qoraalkani waxa ku jirta warbixin muhiim ah oo ku socota magangelyo-doonka Norway.

Waxa aad wax ka akhrisan kartaa mawduucyada soo socda :

- Qofkee heli kara Magangelyo ?
- Ucelinta (ku wareejinta) waddan kale oo ammaan ah
- Maxaa dhacaya marka aad codsanayso magangelyada ?
- Talooyin muhiim ah oo ku saabsan is caddaynta (egener klæring) iyo waraysiga.
- Waajibka xog qarinta
- Haweenka magangelyo doonka ah
- Carruurta

QOFKEE HELI KARA MAGANGELYO ?

1. Magangelyo

Waxa aad xaq u leedahay magangelyo haddii ay naftaada ama xorriyadda-adu halis ku jirto, ama haddii aad halis u tahay jirdil ama hab-dhaqan kale oo bini'aadanimada ka baxsan oo ay sabab u tahay meesha aad ka soo jeeddo, diin-taada, jinsiyaddaada, xubin aad ka tahay urur bulsho oo gaar ah ama ra'yigaaga siyaasideed. Arrintani waxay ku qeexan tahay heshiiska Jineefa ee qaramada midoobay ee ay Norway saxeexday.

Cadaadiska (dabagalka) si gaar ah loogu sameeyo haweenka iyo cadaadiska ka dhasha hab-dhaqanada galmo iyana waxa lagu heli karaa magangelyo. Cadaadiska (dabagalka) qofka ka soo gaadha dowladda waddankiisa iyo ka kaga yimaadda dadka kaleba, sida xubno qoyska ka mid ah ama kooxo hubaysan, intaba waxa lagu heli karaa magangelyo.

Haddii dowladda waddankaagu ay ku siin karto ilaalin ama aad ku nabadgelayso qayb waddankaaga ka mid ah, markaa sida caadiga ah ma helaysid magangelyo.

2. Ilaalin

Haddii aad buuxin weydo shuruudaha magangelyada, waxa ay dowladda Norway qiimaynaysaa in aad halis ku geli karto dalkaaga hooyo oo aad markaa u baahan tahay ilaalin. Sababtu waxay tusaale ahaan noqon kartaa dagaal ama wax kale oo halis gelin kara naftaada, ama iyadoo aad halis u noqon karto jirdil ama hab-dhaqan kale oo bini'aadanimada ka baxsan.

3. Sababo bini'aadanimo

Waxa jira xaalado gaar ah oo keeni kara in lagu siiyo degganaansho arrimo bini'aadanimo awgood, tusaale ahaan haddii adiga ama ilmo aad dhashay uu qabo xanuun aad u khatar ah isla markaana aanay suuragal ahayn in lagu daaweeyo dalkaagii.
Haddii aanad haysan sababo xoog leh oo aad magangelyo ku hesho, waxa markasta kuu suuragal ah in aad la noqoto codsigaaga magangelyo.

Uwareejinta (u celinta) waddan kale oo ammaan ah

Haddii lagaa diiwaan geliyey tusaale ahaan faro lagaaga qaaday waddan kale oo ammaan ah intii aanad iman Norway, ama aad fiise u haysato waddan kale oo ammaan ah, waddankaas ayaa ka masuul noqonaya ka baaraandegga codsigaaga magangelyo. Waxa sidaas darteed dhici karta in lagugu celiyo waddankaas. Arrintani waxa ay gaar ahaan khusaysaa waddamada ku jira wadashaqaynta "Dablin", waana waddamada midowga yurub iyo dalka Island.

Waxa ay qaadan kartaa 3 – 10 bilood inta ay dawladda Norway soo baadhayso in aad soo martay waddan kale oo ammaan ah oo markaa ay dhici karto in lagugu celiyo. Haddii ay baadhiddu qaadato wakhti badan, waxa dhici karta in ay UDI du waraysi kula yeelato. Laakiin dawladda Norway ka baaraandegi mayso codsigaaga magangelyo ilaa ay kala caddaato in lagugu celinayo waddan kale oo ammaan ah iyo in kale. Xaq uma lihid in aad shaqayso muddada sugitaanka. Haddii ay caddaato in aan lagugu celinayn waddan kale, waxa markaa codsigaaga lagaga baaraandegayaa Norway.

Haddii xaaskaaga ama ilmo aad dhashay oo ka yar 18 sano ay magangelyo weydiisteen waddan kale, waxa dhici karta in la isugu kiin wareejiyo waddanka magangelyada la hor weydiistay. Arrintani suuragal ma aha haddii adiga ama cid ka mid ah qoyskaaga la diiday codsigoodii magangelyo.

MAXAA DHACAYA MARKA AAD CODSANAYSO MAGANGELYADA ?

1. Diiwaangelinta magangelyo doonka

Boolisku waxa uu kuu diiwaangelinayaa in aad tahay magangelyo doon. Boolisku waxa kale oo uu kaa qaadayaa faro waxana uu ku weydiinayaa qofka aad tahay iyo jidka aad u soo martay Norway. Waxa aad u dhiibaysaa baasboorkaaga iyo warqadaha caddaynta ah ee kaleba booliska. Waxa markaa ka dib laguu dirayaa xero qaxooti oo aad joogi doonto muddada hore.

2. Baadhitaan caafimaad

Maalmaha ugu horreeya gudahooda ayaad mari doontaa baadhitaan caafimaad. Dadka oo dhan waa in laga baadhaa xanuunka qaaxada. Baadhitaanka xanuunada kale (sida hiifka/aydhiska iyo jooniska ama cagaarshowga) iyagu khasab ma aha.

3. Warbixin ay bixiso NOAS

Maalmaha ugu horreeya ayay warbixin ku siinaysaa NOAS. NOAS waa urur ka madax bannaan dowladda oo siiya warbixin iyo talooyin dadka magangelyo doonka ah. Marka hore waxad daawan doontaa filim warbixin ah waxana lagu siin doonaa qoraal warbixineed oo ku qoran afkaaga hooyo ama luqo kale oo aad si fiican u fahmayso. Marka aad filimka daawato ka dib, waxa kula hadli doono qof la taliye ah oo ku hadla afkaaga hooyo ama luqo kale oo aad si fiican u fahmayso. Wadahadalku waxa uu qaadanayaa qiyaastii 40 daqiiqo. Waxa talooyin lagaa siin doonaa sida ugu fiican ee aad codsigaaga magangelyo ugu bandhigi karto dowladda Norway. La taliyuhu waxa uu warbixin kaa siin doonaa shuruudaha u yaalla si magangelyo looga helo Norway. Waxa muhiim ah in aad uga faa'iidaysato wadahadalkan dhammaan wixii su'aalo ah ee aad qabto ee ku saabsan codsiga magangelyo.

4. Iscaddayn

Marka aad maalmo joogto xerada qaxootiga, ayaad qori doontaa bayaan iscaddayneed oo aad ku sharxi doonto sababta aad magangelyada uga codsanayso Norway. Waxa aad ku qori doontaa iscaddaynta afkaaga hooyo ama luqo kale oo aad xoog u taqaan. Hay'adda agaasinka ajnebiga UDI ayaa markaa ka dib u turjumaysa iscaddayntaada af-norweji.

ISCADDAYNTA WAXA AAD KAGA JAWAABI DOONTAA SU'AALAHA LA XIRIIRA :

- Adiga naftaada iyo xubnaha qoyskaaga. Arrintani waa muhiim haddii qoyskaagu uu marka dambe soo codsan doono in uu kuu yimaado.
- Maxaad uga timi dalkaagii hooyo.
- Maxaad uga cabsanaysaa in aad ku noqoto dalkaaga hooyo.
- Qaxitaankii iyo jidka aad soo martay, taas oo macnaheedu tahay jidka aad u soo martay Norway.

Iscaddaynta waxa aad ku buuxin doontaa xafiisyada ay UDI du ku leedahay xerada qaxootiga. Haddii ay jiraan sababo gaar ahi, waxa aad ka codsan kartaa UDI da in aad iscaddaynta u qaadato oo ku soo qorto qolkaaga. Arrintu si kastaba ha ahaatee waa in aad soo celisaa iscaddaynta isla maalintiiba.

Codsiyada magangelyada ee dadka ka yimi dalal gaar ah waxa looga baaraandegaa si dhakhso ah. Sidaas darteed dadkaasi ma buuxiyaan iscaddaynta. Waxa aad ogaan kartaa waddamadani kuwa ay yihiin haddii aad waydiiso NOAS.

Ha u ogolaanin in cid kale kuu buuxiso iscaddayntaada.

Dadka aan wax qori karin waxna akhiyi karini ma buuxinayaan iscaddaynta.

5. Waraysiga Hay'adda agaasinka ajnebiga (UDI)

Waxa muddo kooban gudaheed waraysi (interfiyuu) kula yeelan doonta UDI da. UDI du waa hay'adda ay dawladdu u xilsaartay ka baaraandegida codsigaaga magangelyo. Waraysigu waxa uu sida caadiga ah qaataa qiyaastii 4 saacadood. UDI du waxa ay isticmaali doontaa warbixinta aad ku dhiibto iscaddaynta iyo waraysiga (interfiyuuga) si ay u qiimayso in aad u baahan tahay magangelin, ama degganaansho sabab kale awgeed.

6. Turjumaan

Marka ay waraysiga kaa qaadayso UDI du waxa goobjoog noqon doona qof turjumaan ah oo ku hadla luqo aad si fiican u fahmayso. Turjumaanka waxa saaran waajib xog-qarineed. Shaqada turjumaanku waxa ay tahay in uu turjumo oo keliya. Turjumaanku mar walba waa in uu ahaado mid dhexdhexaad ah. Haddii ay dhibi kaa qabsato turjumaanka, waa in aad isla markiiba u sheegtaa qofka ku waraysanaya.

Xaq uma lihid in aad adigu doorato qof turjumaan ah marka ay waraysiga kula yeelanayso UDI du.

7. Ogolaansho shaqo oo ku meelgaar ah

Waxa lagu siin karaa ogolaansho shaqo oo ku meelgaar ah waraysiga UDI da ka dib haddii la helo shuruudaha soo socda :-

- Haddii aad ka weyn tahay 18 sano jir.
- Haddii aan laga shakisanayn qofka aad tahay.
- Haddii la go'aamiyey in aan laguu wareejinayn waddan kale oo ammaan ah.

Waxa ay qaadataa ugu yaraan 6 bilood inta lagu helo ogolaanshaha shaqo ee ku meelgaarka ahi.

8. Daaweynta

Waxa aad xaq u leedahay daaweynta lagama maarmaanka ah inta aad sugayso jawaabta codsigaaga magangelyo. Carruurta da'doodu ka yar tahay 7 sano waxa ay leeyihiin daaweyn lacag la'aan ah. Dhammaan dadka kale waa in ay sida caadiga ah iska bixiyaan qayb ka mid ah daaweynta. Haddii aad u baahato caawimo dhakhtar dhinaca cilmi-nafsiga ah, waxa aad UDI da ka codsan kartaa in ay kaa daboolaan kharashka dhakhtarka. Kala hadal maamulka xerada wixii faahfaahin dheeraad ah.

9. Intee ayay qaadataa in jawaab laga helo UDI da

UDI du waxa ay ku isticmaali kartaa inta u dhaxaysa dhowr toddobaad ilaa hal sano ka baaraandegidda codsigaaga magangelyo. Waxa jira sababo badan oo keeni kara in wakhtigu sidaas u kala bato. Xaaladaha qaar waa in ay UDI du baadhitaano samaysaa, tusaale ahaan in ay kuu celin karaan waddan kale oo ammaan ah.

10. Xerada qaxootiga

Waxa laguu fidinayaa in aad degto xero qaxooti inta codsigaaga magangelyo go'aan laga gaarayo.

Haddii ay jiraan sababo muhiim ah oo aad ku doonayso in lagu dejiyo meel gaar ah, waxa habboon in aad degdeg ugu wargeliso maamulka xerada arrintaas. Sababuhu waxay tusaale ahaan noqon karaan haddii ay dad ehel dhow ahi kuu joogaan meel, ama aad shaqo ka hesho meel gaar ah, amaba haddii ay jiraan sababo caafimaad oo xoog badani. Qofku wuu dooran karaa in uu iskii u dego meesha uu doonayo, laakiin markaa waxa uu waayayaa gunnadii dhaqaale.

11. Warbixin cusub

Haddii marka UDI du ay waraysiga kaa qaado ka dib aad hesho warbixino cusub oo macno u samaynaya codsigaaga magangelyo, waa in aad isla markiiba warbixinta gaarsiisaa UDI da. Waxad kala xidhiidhaa shaqaalaha xerada si ay warbixin kaaga siiyaan waddada aad u marayso arrintan.

12. Fal-dembiyeedyo

Haddii aad ku kacdo fal-dambiyeedyo, waxa la soo dedejinayaa ka baaraandegidda codsigaaga magangelyo, iyadoo ujeedadu tahay in si dhakhsiiyo ah dalka lagaaga saaro haddii aanad haysanin sababo keenayo in ilaalin lagu siiyo. Fal-dembiyeedku waxa kale oo uu kaa xanibi karaa in aad mar kale soo gasho Norway iyo waddamo badan oo kale oo yurub ah.

13.Diidmada ka timaada UDI – xaqa cabashada (rafcaan qaadashada)

Haddii ay UDI du diido codsigaaga, waxa aad xaq u leedahay in aad cabasho (rafcaan) ka qorato diidmada. Waxa laguu qabanayaa qareen (abukaate). UDI du waxay go'aanka diidmada u diraysaa qareenkaaga. Qareenkaaga ayaa kuu sharxaya sababta loo diiday codsigaaga. Haddii aad go'aansato markaa in aad rafcaan ka qaadato go'aanka diidmada, adiga iyo qareenka ayaa wadajir isula garanaya waxa uu ku qorayo rafcaanka. Rafcaanka waa in lagaga hadlaa arrimaha ay UDI du u cuskatay diidmada, waana in ay ku qeexnaadaan doodaha ugu muhiimsan ee kiiskaagu. Qareenka waxa lacagta siinaysa dawladda Norway ilaa 5 saacadood. Rafcaanka waa in sida caadiga ah lagu soo gudbiyaa 3 toddobaad gudahood.

14.Ka baaraandegidda rafcaanka ee Guddida ajnebiga (UNE)

Sida caadiga ah waxa aad joogaysaa Norway inta rafcaankaaga go'aan laga gaarayo. Arrintani sidaa u dhici mayso haddii ay UDI du u aragto in aanad u baahnayn in lagu siiyo ilaalin.

Rafcaanka waxa qiimaynaysa Guddida ajnebiga (UNE). UNE waa hay'ad dowladeed oo ka baaraandegta rafcaanada laga qaato go'aamada ay gaadho UDI du. Haddii UNE ay kaaga baahato warbixin dheeraad ah, waxa ay kuugu yeerayaan kulan.

POLIS

ABBA

15.Diidmada Guddida ajnebiga (UNE) – Waajib dal ka bixid

Haddii UNE diido rafcaanka, waxa aad ku qasban tahay in aad dalka kaga baxdo muddada uu boolisku kuu qabto gudaheeda oo sida caadiga ah laba toddobaad. Marka muddadaasi dhammaato ma haysatid ogolaansho sharci ah oo aad dalka ku joogto, isla markaana laguuma ogolaanayo in aad xero qaxooti ku noolaato.

Waxa markaa kula gudboon in aad la xidhiidho booliska ama Ururka caalamiga ee muhaajiriinta (IOM) si aad ugala ballanto ka bixitaanka dalka. Haddii aad dalka iskaa uga baxdo, waa in aad wargeliso xerada qaxootiga marka aad tegayso.

Haddii aad dalka iskaa uga bixi weydo, booliska ayaa kuu dhoofin doona dalkaagii hooyo. Waxana ay dowladda Norway kugu dallici doontaa kharas-

16.Maxkamadaha

Waxa aad rafcaan uga qaadan kartaa diidmadan kama dambaysta ah maxkamadaha. Haddii aad arrintan doonayso waa in aad sida caadiga ah adigu iska bixisaa lacagta qareenka iyo cashuurta maxkamadda.

TALOOYIN MUHIIM AH OO KU SAABSAN ISCADDAYNTA IYO WARAYSIGA (INTERFIYUUGA)

Adiga ayaa ka masuul ah in dowladda Norway ay hesho warbixinta ay u baahan tahay si ay qiimayn ugu samayso baahidaada ilaalineed. Waxa aanu ku siinaynaa talooyinka soo socda :

- Uga warran si qoto dheer oo faahfaahsan sababta ay lagama maarmaanka u ahayd in aad dalkaagii ka soo baxdo iyo sababta aad uga baqayso in aad dib ugu laabato
- Dowladda Norway waxa ay ka war haysaa xaaladda dalkaaga. Sidaa darteed waxa muhiin ah in aad culayska saarto wixii aad adigu la soo kulantay iyo sida xaaladdu noqonayso haddii dib laguugu celiyo dalkaagii.
- Sida ugu sugan ee suuragal kuu ah u sheeg dhacdooyinka dhab ahaan u dhacay.
- Haddii ay jiraan xaalado ay kugu adag tahay in aad ka warrantaa, waxa habboon in aad marka hore kala hadasho mid ka mid ah la taliyayaasha ka socda NOAS.

- Haddii werwer kaa galo in lagu kalsoonaan karo in aad wax kasta u sheegto dowladda Norway, waxa aad u mihiin ah inaad arrintaa marka hore u bandhigto mid ka mid ah la taliyayaasha NOAS.
- Haddii ay kula socoto carruur ka da' yar 18 sano, waxa sidoo kale muhiim ah in aad ka warranto xaaladdooda iyo waayaha ay la soo kulmeen.
- Haddii ay dhacdo in aad su'aalo fahmi weydo marka lagu waraysanayo, waxa muhiim ah in aad qofka ku waraysanaya ka codsato in uu kuu sharxo.
- Runta sheeg. Warbixinta aan saxa ahayni waxay keeni kartaa in lagu diido sababtoo ah dowladda Norway ma rumaysanayso markaa waxa aad u sheegtay.
- Haddii aad hayso caddaymo wax ka tari kara codsigaaga magangelyo, waxa habboon in aad soo qaadato maalinta lagu waraysanayo, si markaa uu turjumaanku ugu turjumo nuxurkooda UDIda.

Haweenka magangelyo doonka ah

Haweenku waxa laga yaabaa in ay mar marka qaarkood la kulmaan noocyo cadaadis ah oo aanay raggu la kulmin. Arrintani way ku adka-an kartaa haweenka in ay kala hadlaan rag.

Haddii aad rabtid waxa aad la hadli kartaa qof haween ah oo ka mid ah talo bixiyayaasha NOAS. Soo wargeli NOAS marka ugu horraysa ee aad daawato filimka warbixinta ah ka dib.

Waxa kale oo aad dalban kartaa in qof haween ahi kaa qaado waraysiga iyo in turjumaan haween ah laguu qabto marka aad gelayso waraysiga (interfiyuuga) UDIda. Arrintan waxa aad dalban kartaa marka ay kula hadlayso NOAS.

Ma wadataa carruur ?

Dad badan ayaa yimaadda iyaga oo wata carruur ka yar 18 sano. UDIdu waxa ay sida caadiga ah waraysataa carruurta ka da' weyn 12 sano. Waxa muhiim noqon karta in ilmaha loo ogolaado in uu isagu ka warramo wixii uu la soo kulmay. Xaaladaha qaarkood haddii waalidka iyo ilmaha ay ku soo dhacday dhibaato isku mid ahi, waxa dhici karta in dhibtu ku sii cuslaato ilmaha. UDIda waxa jooga shaqaale gaar ah oo waayo-aragnimo u leh waraysiga carruurta. Waraysiga carruurtu wuu ka debecsan yahay kan dadka waaweyn.

Haddii aad ogoshahay in ilmahaaga/carruurtaada ka waaweyn 12 sano waraysi lala yeesho, waa in aad sheegtaa marka aad kulanka la leedahay NOAS.

Ma ka yar tahay 18 sano ?

Haddii aad ka yar tahay 18 sano oo aad kelidaa timi Norway, iyada oo aanay kula socon waalid ama cid kale oo kaa masuul ahi, waxa aad yeelanaysaa xuquuq gaar ah.

Xeryaha qaxootiga ayaa waxa ay leeyihiin qaybo gaar u ah carruurta iyo dhallinyarada kelidood yimaadda Norway.

Waxa ku caawin doona qof weli (abbaan) ah. Weligu waa qof weyn oo masuul ka noqon doona danahaaga. Weligu waxa uu kula joogi doonaa marka ay waraysiga kula yeelanayso UDIdu.

Waxa kale oo ku caawin doona qareen. Qareenku waxa uu kaa caawin doonaa codsigaaga magangelyo ee Norway. Waxa aad sida caadiga ah la kulmi doontaa qareenkaaga ka hor inta aan lagaa qaadin waraysiga UDIda, isaga oo qareenku kaa caawin doona u diyaar garowga waraysiga. Waxa kale oo aad la kulmi doontaa qareenka waraysiga ka dib. Waxa aad markaa wadajir u eegi doontaan waraysigii lagaa qaaday si aad u hubsataan in waxa ku qoran waraysigu ay sax yihiin.

Dawladda Norway waxa ay isku deyi doontaa in ay ka soo hesho waalidkaaga dalkii hooyo haddii ay suuragal tahay.

Dad badan oo waaweyn ayaa sheegta in ay ka yar yihiin 18 sano, waayo waxa ay aaminsan yihiin in ay arrintani siin karto fursad weyn oo ay ku heli karaan magangelyo. Sidaa darteed waxa ay UDIdu xaalado badan ku samaysaa baadhitaan dhakhtar si ay u sugto da'da. Adiga ayaa dooranaya in aad ogolaato in la baadho da'daada iyo in kale, laakiin haddii aad diido waxa dhici karta in ay diidmadaasi dhaawacdo codsigaaga magangelyo. Haddii baadhitaanku soo caddeeyo in aad ka weyn tahay 18 sano, waxa laguula dhaqmi doonaa sidii qof weyn, waxana laguu wareejin doonaa xeryaha dadka waaweyn.

Waajib xog qarin

Dowladda Norway, turjumaanka, qareenka iyo NOAS intaba waxa saaran waajib xog qarineed. Taa macneheedu waa in aanay warbixinta codsigaaga magangelyo u gudbin karin dowladda dalkaagii hooyo iyo cid kale midna. Waxa sidaas darteed kula gudboon in aanad ka baqin in aad si qoto dheer uga warbixiso sababta aad u doonayso ilaalinta (magangelyada).

POLITIET

Boolisku waxa uu diiwaan geliyaa dadka cusub ee magangelyo doonka ah. Waxa kale oo boolisku dalka ka saaraa dadka magangelyo doonka ah ee iskood dalka uga bixi waayey ka dib markii ay heleen diidmo.

UDI
Utlendingsdirektoratet

Hay'adda agaasinka ajnebigu (UDI) waa hay'ad xukuumadeed oo ka shaqaysa arrimaha ay ka mid yihiin ka baaraandegidda codsiyada magangelyo doonka, isu keenista qoysaska, dal kugal yada iyo jinsiyadda. Hay'addu waxa kale oo ay ka masuul tahay xeryaha qaxootiga iyo dejinta iyo dad dhexgelinta magangelyo doonka sharciga ka helay Norway.

Postboks 8108 Dep., 0032 Oslo
Cinwaanka booqashada : Hausmannsgt. 21, Oslo
Tlf.: 23 35 15 00, faks: 23 35 15 01
Internet: www.udi.no, e-post: udi@udi.no

IOM • OIM

Ururka caalamiga ah ee muhaajiriinta (IOM) waa urur caawimo ka geysta arrimaha ay ka mid yihiin dadka iskood u noqonaya.

Postboks 8927 Youngstorget, 0028 Oslo
Cinwaanka booqashada : Storgata 10 A, dabaqa 2aad, Oslo. (Waad iman kartaa maalin walba saacadaha 10.00 -12.00.)
Tlf.: 23 10 53 22. (Waad soo hadli kartaa maalin walbal saacadaha 13.00-17.00.)
Internet: www.iom.no, e-post: iomoslo@iomosl.org

UTLENDINGSNEMNDA
UNE

Guddida ajnebiga (UNE) waa hay'ad dawladeed oo madax bannaan oo ka baaraandegta cabashooyinka laga qaato go'aamada diidmada ah ee ay gaadho UDIdu.

Postboks 8165 Dep., 0034 Oslo
Cinwaanka booqashada : Stenersgt. 1B, Oslo
Tlf.: 21 08 50 00, faks: 21 08 50 01
Internet: www.une.no, e-post: postmottak@une.no

Guddida sare ee qaramada midoobay ee qaxootiga (UNCHR) waa ururka qaramada midoobay u qaabilsan qaxootiga caalamiga ah. Xafiis goboleedka UNHCR ee wadamada "baltikan" ka iyo waddamada waqooyigu waxa uu ku yaallaa magaalada "Stockholm" ee dalka Sweden. Norway UNCHR waxa ay wadashaqayn la samaysaa NOAS.

NOAS

Postboks 8893 Youngstorget, 0028
OsloCinwaanka booqashada:
Torggt. 22, Oslo
Tlf.: 22 36 56 60, fax: 22 36 56 61
Internet: www.noas.org, e-post: noas@noas.org

Illustration/design.HORIZONTE Pachy Rodriguez